Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Juun 2024 ayaa gaaray 151.35, marka la barbardhigo 150.64 bishii Maajo 2023.

Isbedel bileedka, Juun 2024, marka la barbar dhigo Maajo 2024, ayaa hoos u dhacay 0.47 boqolkiiba.

Sare u kaca ugu badan ee billaha ahi ayaa ahaa qiimaha **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** 15.54 boqolkiiba & **Maqaayadaha & Hoteelada** 14.47 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ee **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa inta badan ka yimid qiima kororka **Maqal & Muuqal, Sawir iyo Habaynta Macluumaadka** +18.33 boqolkiiba. Qiimaha kororka **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa ka yimid qiimaha **Adeegyada Cuntada** +21.69 boqolkiiba.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Juun 2023 iyo Juun 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.31 boqolkiiba, marka la barbardhigo 4.80 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Maajo 2023 iyo Maajo 2024.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Juun 2024 (Dec 2014 = 100)

Tusaha Sicirka Badeecadaha, Juun 2024	
Tusaha bishan (Juun 2024)	151.35
Tusaha bishii hore (Maajo 2023)	150.64
Tusaha sanadkii hore (Juun 2023)	143.72
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.47%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.31%



War bixin bileedka bisha ***Maajo 2024*** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka http://www.nbs.gov.so Twitter: @NBS_somalia

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Juun 2024

Heerka sicir-bararka bisha Juun 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Juun 2023 iyo Juun 2024.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.31 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Juun 2023 iyo Juun 2024, marka labar bardhigo 4.80 boqolkiiba 12kii bilood, Juun 2023 iyo Juun s2024.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Juun 2024 ayaa sameeyey hoos u dhac dhan 0.47 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Juun 2024.

Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada** iyo **guryaha, biyaha**, **korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay -1.60 boqolkiiba, bishii Juun 2024 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 3.83 boqolkiiba bishii Maajo 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -0.07 boqolkiiba bishii Juun 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 0.02 boqolkiiba Maajo 2024.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa hoos u dhac bille ah sameeyey 0.08 boqolkiiba ee Juun 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 3.41 boqolkiiba Juun 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo sare u kacay 4.10 boqolkiiba ee Maajo 2024.

Dhamaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay.

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha ***Maajo 2024*** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. http://www.nbs.gov.so Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Juun 2024(Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 57.30 boqolkolkiiba bishii Juun 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+84.95 boqolkiiba).

- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 24.87 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+25.57 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+102.66 boqolkiiba).

- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 22.60 boqolkiiba bishii Juun 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+35.12 boqolkiiba).

- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 22.41 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+28.68 boqolkiiba).

- **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 15.54 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Maqal & Muuqal, Sawir iyo Habaynta Macluumaadka oo u gaaray (+18.33 boqolkiiba).

- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 9.41 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+12.67 boqolkiiba).

- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.32 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto Dugsiga sare oo u gaaray (+28.81 boqolkiiba).

- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 5.64 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Gawaarida iibka ah sare oo u gaaray (+13.03 boqolkiiba).

- **Kirada Guryaha & korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 3.41 boqolkolkiiba bishii Juun 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha agabka dayactirka iyo hagaajinta guriga (+8.68 boqolkiiba).

- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 2.58 boqolkiiba, bishii Juun 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+7.85 boqolkolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Juun 2024(-)

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -3.98 boqolkiib bishii Juun 2024. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (-13.60 boqolkiiba).

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB –da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Juun 2024 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Juun 2024(+)

- **Hawo Bedeleshada & Dhaqanka** ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 15.54 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha Maqal & Muuqal, Sawir iyo Habaynta Macluumaadka oo u gaaray (+18.33 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 14.47 boqolkiiba bishii Juun 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+21.69 boqolkiiba).
- **Isgaarsiinta** ayaa la diwaangaliyey sare u kac bille ah 10.42 boqolkolkiiba bishii Juun 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+14.84 boqolkiiba).

- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac bille ah oo dhan 4.96 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+3.63 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+17.84 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 4.42 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha lagu iibsado baabuurt (+12.44 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 2.71 boqolkiiba Juun 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+3.89 boqolkiiba).

Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay

- **Tubaakada** ayaa la diiwaangaliyey hoos u dhac bille ah oo gaaraya -10.02 boqolkiib bishii Juun 2024. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (-16.92 boqolkiiba).

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Juun 2024ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Juun 2023 TSB	Maajo 2024 TSB	Juun 2024 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha Tsb	**100.00**	**143.72**	**150.64**	**151.35**	**0.47**	**5.31**
Cuntada & Cabitaanada	46.04	149.54	151.88	149.44	-1.60	-0.07
Tubaakadda	1.25	162.88	173.80	156.39	-10.02	-3.98
Dharka & Kabaha	5.03	168.14	200.04	209.96	4.96	24.87
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	139.78	144.43	144.55	0.08	3.41
Agabka Guryaha	2.93	116.56	123.79	127.53	3.02	9.41
Caafimaadka	5.00	178.18	182.78	182.78	0.00	2.58
Gaadiidka	3.77	121.22	122.64	128.06	4.42	5.64
Isgaarsiinta	2.80	117.07	166.78	184.16	10.42	57.30
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	104.30	104.30	120.51	15.54	15.54
Tacliinta	4.00	109.11	116.95	117.10	0.13	7.32
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	145.78	156.13	178.72	14.47	22.60
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	114.03	135.90	139.58	2.71	22.41

Ogeysiis:
Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta.

Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.

Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Juulay, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 September, 2024. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee http://www.nbs.gov.so

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Juun 2024 marka loo eego COICOPka

Dhamaan qeybaha TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha ***Maajo 2024*** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. http://www.nbs.gov.so Twitter: @NBS_somalia